

# Nidaamka waardiyaynta beesha ee Hounslow Homes

## **Dhisitaanka beelo aami an ah (Building Safer Communities)**

Nidaamka waardiyaynta beesha ee Hounslow Homes' waa adeeg ay bixiso Hounslow Homes oo ay taageeraan Degmada Hounslow, bilayska Hounslow iyo ururka guryaha ee Thames Valley Housing Association. Waxa uu nidaamka hadafkiisu yahay in:

- Horumarin lagu sameeyo oo beeshaada laga dhigo mid aamin ah
- In la dhimo cabsida laga qano denbiyada
- In caawimo laga gaysto sidii loo dhimi lahaa asluubxumada ijtimaaciga ah oo ay ku jiraan hagardaamda, hagardaamada cunsuriyadda iyo qaska (nuisance).

Wardiyeyaasha beeshu waxa kale oo ay beesha u caawin karaan siyaabo kale; iyadoo gacan siinaya maalmaha madadaalada (fun days), soo sheegista dayactirka, soo sheegista gawaadhida la tuuray, soo jeedinta horumarinta bii'adda iyo inay gacan ka gaystaan arrimaha degdegga ah.

32ka xaafadood ee nidaamkani ka hirgalay waxa lagu doortay heerka asluubxumada ijtimaaciga ah, denbiyada, saboolnimada ijtimaaciga ah ee markaas ka jirtay. Xaafadaha kale ayaa lagu dari karaa haddii ay kordhaan asluubxumada ijtimaaciga ah iyo denbiyada oo loo baahdo amaan dheeraad ah. Dhammaan xaafadaha way ka faa'iidayaan karaan Adeegga waardiyaynta beesha ee Hounslow Homes. Adeeggan waxa macnahiisu yahay in wakhtiyada qaar ay waardiyeyaashu muddo gaaban joogi doonaan xaafado kale si ay wax uga qabtaan arrimo gaar ah oo u baahan in wax laga qabto. Wardiyeyaasha beeshu waxay qaban doonaan waardiyayn ay si muuqata xaafadda ugu soo maraan lug iyo gaadhib, maalin kasta marka laga bilaabo 3pm illaa 11pm, taas oo ay ka fulin doonaan xaafadaha ugu muhiimsan (*\*xaafadaha ugu muhiimsani waa kuwa leh waardiyeyaal lagu dhex arko, 7 da maalmood ee wiigga marka laga bilaabo 3 pm illaa 11pm*).

- Oriel Estate
- Convent Way
- Beavers Estate
- Haverfields
- Brentford Towers
- Ivybridge

Fadlan isticmaal adeegyada sarkaalka guryaha ee ku qaabilsan, oo isaguna isagoo la shaqaynaya koox waardiyeyaal ah iyo ururro kale ka shaqaynaya sidii loo dhimi lahaa denbiyada cabsida ka jirta beelahaaga.

**Iskaashigaaga iyo taageeradaada ayaa loo baahanyahay si xaafadahayaga looga dhigo meelo amaan ah oo nadiif u ah si loogu noolaado.**

Fadlan u soo sheeg xafiiskaaga guryaha dhibaatooyinka asluubxumada ijtimaaciga ah, graffiti, hagardaamada cunsuriyadda ah, rebshadda dhallinyarada, gawaadhida la tuuray, hantida la burburiyo, sanqadha, xashiishka la daadiyo.

- Mandaqadda dhexe (020) 8583 4382 ama minicom (020) 8583 3959
- Mandaqadda bariga  
(020) 8583 4220 ama minicom xafiiska Chiswick (020) 8583 4220 ama minicom xafiiska Brentford (020) 8583 4390
- Mandaqadda galbeedka (020) 8583 4383 ama minicom (020) 8583 4387

Haddii aad rabto warqaddan ku saabsan Nidaamka waardiyaynta beesha ee Hounslow Homes oo ku qoran luqad kale ama ku daabacan qaab kale, fadlan la soo xidhiidh 020 8583 2299 ama minicom 020 8583 3122.